Tuberculosis - Somali

Qaaxada (TB)

Qaaxada way sii kordhaysaa –
Hubso inaad ka ogaatid runta

Qaaxada (TB) waa cudur bukasho leh oo inta badan ku dhaco sambabaha, laakin wuxuu ku dhici karaa qayb kasto oo ka mid ah jirka. 150 sanadood ka hor, waxu galabsaday hal dhimasho siddeed qofoodba ee gudaha UK, laakin 1980-dii, guriyeenta iyo nafaqada iyo daawaynta oo aad u sii fiicnaadeen, waxuu cudurka ka noqday wax aan caadi ahayn UK. Si kastaba ha noqotee, Qaaxada (TB-da) ma loo xaaqin si dhammaystiran. 20kii sanadood ee la soo dhaafey tirada dadka qaba Qaaxada ee UK way sii kordhaysaa, Qiyaastii 7000 qofood ayaa haatan qaadaan Qaaxada - sanad kasto - caadi ahaan hal qof 10,000 oo qof ee ka tirsan dadwaynaha. Qaaxada ma lagu qaado si fudud - waa inaad xiriir sokeeye la yeelataa qof qabo Qaaxada waqti dheer (inta badan maalmo badan) - laakin qof kasto waa inuu ogaadaa astaamaha cudurka si uu doonto daawayn sida ugu degdeg badan ee suurto galka ah.

Waxaa Qaaxada lagu daawayn karaa iyada oo la qaadanaayo daawooyinka lagu magacaabo antibiyotiko.

Sidee Qaaxada ku fiddaa iyo aniguna u qaadi karaa?

Waxay Qaaxada ku fiddaa hawada markii dadka qabo ku qufacaan ama ku hindhisaan.
Laakin si aad uga qaadid waxaad u baahan tahay inaad joogtid agagaarka qofka qabo cudurka maalmo badan. Sidasi darted, tusaale ahaan ma u muuqan karto inaad ka qaadid Qaaxada markaad saran tahay baska ama gaadiidka hoose (tube).

Qof kasto oo qabo Qaaxada ma ahan fiddiye, dadka ku bukada Qaaxada fidda waxay si deg deg ah ku noqdaan kuwo aan fiddineeynin - guud ahaan labo toddobaad ka dib – **haddii ay sii qaadanayaan daawada ku habboon.**

Bacdamaa uu qof kasto qaado Qaaxada, waxaa jirto in koox dad ah ay uga halis badan yahiin kuwo kale.
Waxaa ku jiro dadkaas kuwa:

• ku wada nool isla guriga- ama la lahaa xiriir dheer- qof qabo cudurka Qaaxada

• ku nool xaalado caafimaad darro ama buux-dhaaf leh, ay ku jiraan kuwa ah guri-laawayaal ah ama seexdo meel xun

• ku soo noolaadeen, ka soo shaqeeyeen waqti dheer dal ay aad ugu tiro badan tahay Qaaxada, sida koonfur bari Aasiya, Afrikada ka hoosaydo Saharada iyo qaar ka mid ah Yurubta bari

• ugu noolaan karay Qaaxada dhallinyaradoodii markii uu cudurka aad caadi uga ahaa dalkaan

• ay yahiin caruurta waaliddiinta oo dalkooda asalka ah uu qabo tirada sare ee Qaaxada

• soo galay xabsi

• aan awood u lahayn inay is-kala dagaalamaan cudurka (aan lahayn iska caabiyaasha jirka) jirro aawgeed (tusaale ahaan cudurka HIV) ama daawo qaata.

• caadaystay muqaadaraadka ama aalkolka

• aan cunin cunto ku filan si u ahaadan kuwo caafimaad leh.

Sidee ku ogaadaa haddii aan qaaday Qaaxada?

Waxaa ku jiraan astaamaha ugu caansan Qaaxada:

• Qonfac ku dhammaanaayo in ka badan seddax toddobaad

• culayska oo si sabab la'aan ah u dhumaayo

• xumad iyo habeenkii oo loo dhidido si xoog leh

• dareen daal iyo caafimaad darro guud oo ahayn caadi

• cuntada oo la doonayn, heerarka dambe

• in la soo qufaco dhiig

Waxay dhammaan kuwaan noqon karaan astaamaha dhibaatooyin kale laakin haddii aad qabtid astaamahaan oo aadna ka welwelsan tahay, kala hadal takhtarka ama kal-kaaliyaha rugta ama kiliinikada deegaankaada, ama xarunta bukaan socodka ee NHS ama soo wac telefoonka NHS Direct ee 0845 4647.

(Badbaadinta bukaanlayda aawgood, dhammaan soo wacitaanada Khadka toosa ee NHS waa la duubayaa. Waxaa soo wacitaanada lagu bixinayaa isla lacagta ah sida kuwa deegaanada.)

Haddii aad la qabtid xiriir sokeeye qof lagu arkay Qaaxada oo ay jirto halista ah inaad ka qaadi karaysid cudurka, waxaa lagaaga samaynayaa baaritaan kiliinikada gaarka ah ee Qaaxada.

Haddii aan qaaday Qaaxada, miyaa layga daawayn karaa?

Haa, waxaa Qaaxada lagu daaweeyaa antibiyotiko gaar ah. Mar haddii la bilaabo daawaynta, waxaad bilaabaysaa inaad dareentid inaad si fiicnaaneysid labo toddobaad ka dib. Laakin daawaynta waa inay sii socotaa ugu yaraan lix bilood. Aad ayay muhiim u tahay in si buuxdo loo sii wado si loo daaweeyo Qaaxada. Haddii aadan samayn, Qaaxada dib ayay ugu soo noqon kartaa iyada oo ah nooc u gegsan karo daawooyinka caadiga ah oona kasii dhib badan si loo daaweeyo. Waxaadna ugu sii gudbin kartaa nooc ka sii xun qooyskaada iyo saaxibadaada.

Haddii Qaaxada si ku habboon loo daawayn, waxay keeni kartaa dhimasho.

Waxaan filaayay in Qaaxada looga hortago talaal?

Waxaa jiro talaal (BCG) oo looga isticmaali jiray dalkaan sanooyin badan si layskaga difaaco Qaaxada. Waxuu talaalka BCG aad ugu fiican yahay in looga hortago noocyada Qaaxada aad u xun ee caruurta. Si kastaba ha noqotee, talaalka BCG ma ka hortago dhammaan arrimaha Qaaxada sidaasi darted waxaad u baahan tahay inaad garatid calaamadaha iyo astaamaha Qaaxada.

Sidde kale ayaa Qaaxada looga hortegi karaa?

Sida ugu muhiimsan iyo sida ugu waxtarsan oo looga hortago faafidda Qaaxada ee dalkaan waa in lagu sameeyaa baaris lagu ogaado cudurka sida ugu degdegsan ee suurto galka ah iyo in la hubiyo in loo qaato si buuxdo daawaynta ku habboon. Sidaasi darteen ayay u tahay muhiim in la garto waxa ku saabsan cudurka.

Waxaa u socdaa dibedda, ma u baaha nahay inaan isku duro BCG?

Haddii aad u socotid inaad ku noolaatid ama aad ka shaqaysid in ka badan hal bil dal leh tirada sare ee Qaaxada, ama aad soo booqanaysid keliya waqti la mid ah, waxaa muhiim ah inaad ka gaashaamatid Qaaxada. Waydiiso talo takhtarkaada rugta ama kiliinikada.

TIRADA QAAXADA DHABTA AH EE DIIWAANSAN

- Waxay Qaaxada jirtaa qiyaastii ugu yaraan 4000 sanadood-mumiyayaasha masar waxay muujinayaan calaamadaha cudurka

- Qiyaastii 2 bilyan oo qofood (oo ah qiyaastii seddax dolool hal dadyoowga adduunka) waxay qabaan jeermiga cudurka Qaaxada—waxayn sidaas darted halis u yahiin qaadista cudurka Qaaxada (cudurka TB) inta ay ka nool yihiin.

- Waxuu Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) qiyaasayaa in adduunka, qiyaastii 9 milyan oo qof inay qaadaan cudurka Qaaxada sanad kasto.

- Waxay kale Qaaxada sabab u noqotaa qiyaastii 2 milyan oo ah dhimashada sanad kasto. Markii lala barbar dhigo duumada iyo HIV-ga waa mid ka mid ah cudur-bukaaneedka ugu wayn oo ka hor imaanaayo adduunka maanta.

- Afrikada Ka hoosaydo Saharada, cudurka faafo ee HIV-ga waxuu dadka ka dhigayaa mid u nugulsan inuu qaado cudurka Qaaxada.

- Gabi ahaan UK, waxay Qaaxada ku korortay ku dhowaad boqolkiiba 30 ilaa 1980dii, laga soo bilaabo 5745 ilaa in kor u dhaafayso 7000 oo qof sanadkii.

- Gudaha London, tirada arrimaha la xiriiro Qaaxada waa labo-jibaarmeen ilaa 1980dii, iyada oo tiro ahaan ay arrimaha qiyaastii gaareen 3000 sanadkii.

- Gudaha UK, inkasto la heli karo adeegyo wax ku ool leh, in loo dhinto Qaaxada waa dhif.

QAAXADA - WELWELADA CAADIGA QAARKOOD

Waxaad ka qaadi kartaa Qaaxada baska ama gaadiidka dhulka hoos maro (Tube)

Ma dhici karto sidaan sababta oo ah waxaa inta badan u baahan tahay inaad la yeelatid xiriir sokeeye qofka ama dadka qabo saacado badan ama maalmo si aad u qaadid Qaaxada.

Waxaad ka qaadi kartaa Qaaxada dugsiga ama isbitaalka

Ma dhici karto sidaan iyadana. Inkasta oo ay dhacdo waqti ka waqti, waxay aad ugu muuqataa in cunug ama waalid qabo Qaaxada oona u buko inay ka muuqanayaan astaamaha cudurka - sida qunfac ku dhammaanaayo waqti dheer ama culayska oo si xoog leh u dhumo - waxayna qaataan xanaanaynta ku habboon.

Inaadan saarin gacantaada afka ama aadan isticmaalin fasoleeti markii aad qufacaysid ama aad hindhisaydid waxay faafinaysaa Qaaxada

Waxay Qaaxada ku faaftaa qunfaca ama hindhisidda waxayna isticmaalidda gacantaada ama fasoleetigaada markii la saaro afkaaga iyo sankaada dhimaysaa ku faafidda hawada waxa ku jiro ee ah cudurka, laakin ma u muuqan karto inaad ka qaadid qunfac ama hindhisid shil ahaan u dhacay.

Cantuuf-tufiidda waxay faafisaa Qaaxada

In kasta oo ay cantuuf-tufidda lagu farxayn haddana ma u muuqato inay faafinayso Qaaxada.

Waxay Qaaxada ugu fidaysaa gudaha UK sababta oo ah soo galootida

Waxay Qaaxada ku kordhaysaa dalal badan ee adduunka. Run ahaantii, Ururka Caafimaadka Adduunka waxuu caddeeyay inay Qaaxada tahay waxa ugu degdegsan ee caafimaadka caalanka. Waa run in in ka badan bar dadka Qaaxada ee dalkaan ay ku dhasheen dibedda gudaha dalalka ay aad caadi ahaan ugu badan tahay Qaaxada UK. Waxaa dhici karto in Qaaxadooda la arkin sanado badan laakin markii barista lagu ogaado oo isla markaa la daaweeyo, sida qof kasto oo qabo Qaaxada, ma ku faafayso gudaha UK.

Warar dheeri ah

Warar intaa ka sii badan ee ku saabsan sida aad uga gaashamanaysid Qaaxada naf ahaantaada, qoosykaada iyo saaxibadaada, waxaad la soo xiriiri kartaa:

NHS Direct 0845 4647* ama loo soo hadli kartaa takhtarkaada ama TB Alert

* Nabadgelyada bukaanka aawgeed, dhammaan soo wacitaanada NHS Direct waa la duubayaa. Waxaa wacitaanada lagu bixinayaa isla lacagta lagu bixiyo qiimaha wacitaanada deegaanka.

TB Alert waa urur samafal ah ee kor u qaado wacyiga ku saabsan Qaaxada iyo sida loola dagaalamo Qaaxada addun-waynaha.

TB Alert
22 Tiverton Road
London
NW10 3HL
Telefoonka: 0845 456 0995
e-mail: info@tbalert.org
Lambarka Diiwaangelinta: 1071886

Waxaad waliba u soo booqan kartaa
www.immunisation.nhs.uk
www.dh.gov.uk
www.tbalert.org
www.hpa.org.uk

NHS Direct Interactive – waxaa lagu heli karaa adeegga wararka caafimaadka TV-ga satalit'ka iyada oo la riixaayo galuuska hawlqaybiyaha ee fogaan-hagaha.

Waxaa bug-yarahaan looga heli karaa luqadaha kor ku xusan shabakadda internet-ka ee ah www.immunisation.nhs.uk

Qaaxada

Qaaxada way sii kordhaysaa- hubso inaad ka ogaatid runta

Waxaa laga heli karaa nuqulo dheeraad ah bug-yarahaan:
Department of Health Publications (Waaxda Daabacaadda Caafimaadka)
Telefoon: 08701 555 455
e-mail: dh@prolog.uk.com
Telefoonka wax lagu qoro (isticmaalayaasha minicom)
0870 0102 870 ee dadka maqalka culus
8da ilaa 6da Isniin-Jimco

© Crown copyright 2005 266708 1p 818k Mar05 (COL) Designed by Westhill Communications